
CUTUB 5: HAWLGALLADA GOOBIDDA IYO SAMATABBIXINTA AH EE YARYAR

Cutubka dhexdiisa waxaad ku baran doontaa:

- **Qiimaynta Goobid iyo Samatabbixin:** Sida loo qiimeeyo xaaladda ay kooxaha goobidda iyo samatabbixintu ku dhex shaqayn doonaan.
- **Samaynta Hawlgallada Goobidda:** Sida si habaysan loogu goobo dhibbaneyaasha musiibada.
- **Samaynta Hawlgallada Samatabbixinta:** Farsamooyinka nabdoon ee qaadidda madaalinta, dharabaynta, iyo bixinta dhibbanaha

CUTUB 5: HAWLGALLADA GOOBIDDA IYO SAMATABBIXINTA YARYAR

HIMILOOYINKA	<p>Dhamaadka cutubkan, ka qaybqaatayaashu waa inay karaan in ay:</p> <ul style="list-style-type: none">▪ Aqoonso shuruudaha qiimayneed ee xaaladaha goobidda iyo samatabbixinta ee dhici kara.▪ Qeex farsamooyinka ugu caamsan ee goobidda kob dhisme ah.▪ U isticmaal farsamo nabdoon xaaqidda burburka iyo siibida dhibanaha.▪ Qeex dariiqooyin lagu dhawro samatabbixiyeyaasha inta lagu jiro goobidda iyo samatabbixinta.
WAJAHADDA	<p>Wajahadda cutubkan wax aka mid noqon doona:</p> <ul style="list-style-type: none">▪ Arar iyo Guudmar Cutubka.▪ Qaymayn Goobid iyo Samatabbixin ah.▪ Samaynta Hawlgallada Goobidda.▪ Samaynta Hawlgallada Samatabbixinta.▪ Gebagebada Cutubka.
WAQTIGA LAGU QIYAASAY IN LAGU DHAMEEYO	<p>2 saacadood 30 daqiiqo</p>
DARIIQADA TABABBARKA	<p>Macallinka hoggaanka ah ayaa xisaddan ku billaabaya in uu ka qaybgalayaasha ku soo dhaweeyo Cutub 5: Hawlgallada Goobidda iyo Samatabbixinta Yaryar wuxuuna dadka bari barayaasha kale ee cutubkan. Macallinku dabadeed wuxuu guudmar kooban ka bixin cutubkan, waxaana ta aka mid ah farqiga u dhexeeya goobidda iyo samatabbixinta, yoolka goobidda iyo samatabbixinta, muhiimadaha ay kala leeyihiin goobidda iyo samatabbixinta iyo tallaabooyinka ka midka ah goobidda iyo samatanbbixinta waxgalka ah</p> <p>Dabadeed, macallinkaa dib u eegi hannaanka qaymaynta sida ay ula xiriirto goobidda iyo samatabbixinta. Markakan, macallinku wixuu adkaynayaa midda ugu khatar badan halisaha la xiriira dhismayaasha (tusaale., dhisme aan aad loo adkaynin oo dhulgariir ku djacay). Macallinku wuxuu dabadeed carrabka ku adkaynayaa muhiimadda nabdoonaanta samatabbixiyaha inta uu samaynayo qaymaynta oo dhan. Ka qaybgalayaasha waxay dhamaysanayaan layliyo qaymayn ah iyadoo isticmaalaya sinnaariyooyin la siiyeey ama sinnaariyooyin degaanka lagu diyaariyey.</p> <p>Qaybta xigta waxay ka hadli doontaa farsamada goobidda markii dad dhibbanayaal noqon kara la raadinayo. Macallinku wuxuu aqoonsanayaa noocyada hulalka ee ay samayn karaan dhismayaasha dumay, noocyada burburrada ay tahay in ay xubnaha CERT ka fogaadaan, iyop dariiqooyinka ay goobayaashu isticmaali karaan markay raadinayaan dhibbanayaasha ayna qorayaan melahay ka joogaan dhismayaal burbur khafiif ah ama dehexhexaad ahi ku dhacay.</p>

Ugu dambaynta, macallinku wuxuu qeexi farsamooyinka iyo dariiqooyinka samatabbixineed ee dhifashada, qashin-burbur xaaqidda, iyo ugu dambayn qaadidda dhibbanaha. Macallimiinta ayaa muujin doona kabaalinta iyo dharabaynta. Macallimiintu waxay sidoo kale muujin doonaan isticmaalka dhifashada iyo jiididda iyagoo ah farsamo dhibbanaha lagu nabad baxsho, ka qaybgalayaashuna waxay ku celin farsamooyinkan macallinka oo fiirsanaya. Dhamaadka qaybtan, kooxdu waxay ka qaybqaadan jilitaan musiibo oo muujinaya xaaqidda qashinka burburka (burburka) iyo bixinta dhibbanaha.

**WAXYAABAHA LOO
BAAHAN YAHAY**

- *Tilmaanta Macallinka ee Kooxda Kajawaabidda Xaaladda Degdegga ah ee Bulshada*
- *Buugga Ardayga ee Kooxda Kajawaabidda Xaaladda Degdegga ah ee Bulshada*
- Muuqaallada 5.1 ilaa 5.26
- Fiidiyoo dharabaynta ah oo CERT ay leedahay (VT 317)

QALAB

Ka sakow kuwa ku taxan wejiga hore ee Tilmaanta Macallinka, qalabka soo socda ah ayaa loo rabaa cutubkan:

- Kombiyuutar leh barnaamijka PowerPoint
- Kombiyuutar borojekar leh ama shaashad weyn
- 1 qof-loox (mannequin)
- 1 buste
- Shay weyn oo fidsan (sida., miis) iyo dhawr kabaal oo aad u isticmaasho kabaallaynta/dharabaynta
- 1 Biinse fujiye ama biinse dheere 2" x 4"

DIYAARGAROW

Layliga sinnaarooyinka ee uu cinwaankiisu yahay, *Run Uruurinta*, mar hore ayaa la diyaariyey. Nuqullada sinnaariyo waxay ka muuqataa Buugga Ardayga, waxaanay ku jiraan bogagga 5-18 iyo 5-19 ee Talmaanta Macallinka. Waa khiyaarkaa haddii aad doonto in aad sinnaariyooyinkan u beddesho kuwo ku dabbakhmi kara baahida bulshada.

Layliga uu cinwaankiisu yahay, Qaymaynta Goobidda iyo Samatabbixinta wuxuu u baahan yahay diyaarinta sinnaariyooyinka si dhab ah uga dhex dhici kara bulshada. Hubi in aad sinnaariyooyinka xisadda ka hore sii diyaarisay oo aad nuqullo u hayso ka qaybgale kasta. Noocyada xogeed ee soo socda ku dar sinnaariyooyinka:

- Nooca dhacdada
- Xoogga/darraanta/waqtiga
- Degganayaasha ay saamaysay
- Saadaasha hawada ee hadda/la saadaashay
- Waqtiga maalinta iyo isbuuca
- Saameeyayaasha kale ee wax ka beddeli kara hawlaha goobidda iyo samatabbixinta

Xogta la baxsho oo ku saabsan qiimaynta burbur ku saabsan dhismaha ee dhici karta waxay sida badan ku jeeddaa burburka uu keeno dhulgariir. Haddii nooc kale oo musiiibo ah (sida., toornaado, harikeyn, ama daadad) ay u badan tahay in ay ka dhacdo aaggaaga, hel oo xog ku saabsan waxay ku sababi karaan noocyada kala duwan ee dhismayaasha ah ku dar hawshaad ka war bixinayso.

**KOOXDA KAJAWAABIDDA XAALADDA DEGDEGGA AH EE BULSHADA
CUTUB 5: HAWLGALLADA GOOBIDDA IYO SAMATABBIXINTA YARYAR**

OGEYSIINNO

Inta aad cutubkan ka shaqaynaysid, xusuusnow in aad adkayso doorka CERT ay ku leeyihiin goobidda iyo samatabbixinta. Ka qaybgalayaashu waa in ay tababbarka ka tagaan iyagoo fahamsan xudduudkooda, iyo dareenka ah in nabdoonaantoodu ay muhiim tahay, oo xitaa ka sarraysa dhibbaneyaasha.

Qorshe waqtiyeedka la soo jeediyey ee cutubku waa sida soo socota:

..

Arar iyo Guudmar Cutubka	5 daqiiqo
Qaymayn Goobid iyo Samatabbixin ah	45 daqiiqo
Samaynta Hawlgallada Goobidda	35 daqiiqo
Samaynta Hawlgallada Samatabbixinta	60 daqiiqo
Gebaggebada Cutubka	5 daqiiqo

Wadarta Waqtiga: 2 saac 30 daqiiqo

**SOO JEEDIN GAAR
AH**

Qaymaynta goobidda iyo samatabbixintu waxay ku salaysan tahay muunadda lagu soo bandigay Cutub 2: Nabdoonaanta Dabka. Si taxaddar leh u maraajicee cutubka oo same tusaaleyaal heerar burbur ah oo ku salaysan khataraha la wajaho iyo noocyada dhisme eek u badan bulshadaada. Tisaalayaashaas ku bixi marka ay muhiim noqoto inta casharradu ay socdaan si aad u muujiso qodobbo waxbarasho oo muhiim ah.

CUTUB 5: HAWLGALLADA GOOBIDDA IYO SAMATABBIXINTA YARYAR



U ARARO
(GUUD MAR)
KOORSADA



MUUQAAL 5.1

SOO DHAWEYN IYO ARARTA CUTUBKA

Ku billow xisaddan adigoo ka qaybgalayaasha ku soo dhaweynaya Cutub 5 ee barnaamijka tababbarka CERT.

Bar dadka macallimiinta xisaddan weydiina macallimiinta cusubi hadday jiraan in ay si kooban u qeexaan khibrada ay u leeyihiin hawlgallada goobidda iyo samatabbixinta.

Hawlaha Goobidda iyo Samatabbixinta

- Qaymayn
- Goobidu waxay tahay:
 - Helidda dhibbanayaasha.
 - Diiwaangelinta meesha.
- Samatabbixin waxay ku lug leedahay hannaanka iyo dariiqooyinka loogu baahan yahay I dhibane laga saaro kobta musiibada.

Muuqaal 5.1

Sharax in goobid iyo samatabbixin ay ka kooban yihiin saddex hawlood oo kala duwan:

- Qiimayn oo ku lug leh qaymaynta xaaladda iyo go'aansiga qorshe hawleed nabdoon.
- Goobid oo ku lug leh helidda iyo diiwaangelinta kobta ay kala joogaan dhibbanayaasha.
- Samatabbixin oo ku lug leh hannaanka iyo dariiqooyinka loogu baahan yahay I dhibane laga saaro kobta musiibada.

Tilmaan in khibrad laga helay musiibooyin hore ay tusayso in mar kasta oo ay musiibo dhacdo, cidda ugu horraysa ee u soo miciinta dadka meesha ku xayirmay ay yihiin dad isxilqaamay, oon tababbarrayn, oo ujeedo wanaagsan oo u soo yaaca goobta ay wax ka dumeen iyagoo isku deyaya in ay dhibbanayaasha soo saaraan.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

SOO DHAWEYN IYO ARARTA CUTUBKA (WELI SOCDA)

Isticmaal tusaalaha dhulgariirkii ka dhacay Mexico City, oo ay dedaallo isxilqaamay bedbaadiyeen 800 oo nafood—laakiin ay 100 nafood sababsadeen—si aad muhiimad u siiso wadahaadalkan.

Tilmaan in tusaalaha Mexico City uusan keligii ahayn, laakin uu qayb ka yahay habdhaqan baahsan oo xaaladaha degdegga ah markay dhacaan ah, oo min biyo ku hafasho shil ah, oo uu samatabbixiyuhu laftiisa hafto ilaa iyo dad badan oo mutaddawiciin ah oo iskeena markuu dhaco halaag weyn.

Adkee in sida aadka u badan, dedaallada isxilqaanka ah ee samatabbixinta loola gol leeyahay ay laftoodu keenaan dhaawacyo khatar ah iyo dhibaatooyin is-dul-saarma.

Tilmaan in sii kastaa ha noqotee dedaallada wanaagga loola jeedo ee samatabbixineed ay tahay in la soo qorsheeyo oo la sii muraajaceeyo.



MUUQAAL 5.2

Go'aanka Isku-deyidda samatabbixinta

- Khatarta uga iman karta samatabbixiyaha
- wanaagga ugu weyn tirada dad ee ugu badan

Muuqaal 5.2

Sharax in go'aansiga in laysku dayo samatabbixin ay tahay in uu ku salaysan yahay labo saameeyo:

- Khatarta uga iman karta samatabbixiyaha
- Himilada guud ee u samaynta wanaagga ugu weyn tirada dad ee ugu badan



MUUQAAL 5.3

SOO DHAWEYN IYO ARARTA CUTUBKA (WELI SOCDA)

Yoolalka Goobidda iyo Samatabbixinta

- Samatabbixi tirada dadka ah ugu badan waqtiga ugu yar.
- Samatabbixi dhibbanayaasha sida sahlan u xanniban marka hore.

Muuqaal 5.3

Sharax in ujeeddada hawlgallada goobidda iyo samatabbixintu ay yihiin:

- Samatabbixi tirada dadka ah ugu badan waqtiga ugu yar.
- Samatabbixi dhibbanayaasha sida sahlan u xanniban marka hore.

Si kastaba ha ahaatee, adkee in qofka ugu muhiimsan ee isku dayga samatabbixineed uu yahay samatabbixiyaha.



MUUQAAL 5.4

SOO DHAWEYN IYO ARARTA CUTUBKA (WELI SOCDA)

Goobidda iyo Samatabbixinta Waxgalka ah

- Qiimayn waxgal ah.
- Nabdoonaanta samatabbixiyaha.
- Nabdoonaanta dhibbanaha

Muuqaal 5.4

Sharax in hawlgallada goobidda iyo samatabbixinta oo waxgal ahi ay ku xiran yihiin:

- Qiimayn waxgal ah.
- Nabdoonaanta samatabbixiyaha.
- Nabdoonaanta dhibbanaha.

U sheeg ka qaybgalayaasha in cutubkani uu diiradda saari doono waxyaabaha uu ka kooban yahay hawlgal waxtar ah oo goobid iyo samatabbixin ah—qiimee, goob, oo samatabbixi—iyo dariiqooyinka iyo farsamooyinka ay isticmaali karaan samatabbixiyeyaashu si ay u helaan oo u saaraan dhibbaneyaasha.



MUUQAAL 5.5

**SOO DHAWEYN IYO ARARTA CUTUBKA (WELI SOCDA)
BARTILMAAMEEDKA (UJEEDDADA)**

Ujeeddada Cutubka

- Aqoonso shuruudaha qiimaynta ee xaaladaha goobidda iyo samatabbixinta ee iman kara.
- Qeex farsamooyinka ugu caamsan ee wax ka goobidda dhisme.
- U isticmaal farsamooyinnabdoona xaaqidda jajabka dhismayaaasha dumay iyo soo bixinta dhibbanaha.
- Qeex siyaabo lagu xafido samatabbixiyeyaasha inta lagu jiro hawlgallada goobidda iyo samatabbixinta.

Muuqaal 5.5

U sheeg ka qaybgalayaasha in dhamaadka cutubkan, ay tahay in ay awood u leeyihiin in ay:

- Aqoonsadaan shuruudaha qiimaynta ee xaaladaha goobidda iyo samatabbixinta ee iman kara.
- Qeexaan farsamooyinka ugu caamsan ee wax ka goobidda dhisme.
- U isticmaalaan farsamooyin nabdoon xaaqidda jajabka dhismayaaasha dumay iyo soo bixinta dhibbanaha.
- Qeexaan siyaabo lagu xafido samatabbixiyeyaasha inta lagu jiro hawlgallada goobidda iyo samatabbixinta.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

Weydii in ay ciduna su'aal ka qabto waxa looga hadli doono cutubkan.



**BANDHIG
MAWDUUCA**



MUUQAAL 5.6



**PM, PP. 5-3
ILAA 5-7**

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN

Ku billow qaybtan adigoo xusuusinaya ka qaybgalayaasha in sida hawlgal kale oo kasta oo CERT, goobid iyo samatabbixin ay u baahan tahay qiimayn la sameeyo billawga hawlgalka oo socota inta uu hawlgalku socdo oo dhan..

Qiimaynta Goobida iyo Samatabbixinta ee CERT

1. Run Ururso
2. Qiimee Burburka
3. Tixgeli Waxyaabaha Dhici Kara
4. Qiimee Xaaladdaada
5. Deji Muhiimado
6. Go'aanno Qaado
7. Diyaari Qorshe Ficil
8. Ficil Samee
9. Qaymee Horumarka

Muuqaal 5.6

Xusuusi kooxda in qiimayntu ay tahay hannaan 9-tillaabo ah oo lagu so faahfaahiyey Cutub 2. Ka qaybgalayaasha u dir *Tiglaha Qiimaynta Goobida iyo Samatabbixinta ee CERT Checklist* oo ku yaal Buugga Ardayga, tallaabooyinkana si kooban u muraajicee. U sheeg kooxda in qaybtani ay ka hadli doonto qiimayntu sida ay xiriir ula leedahay hawlgallada goobidda iyo samatabbixinta.



PM, P. 5-3

Tiglaha Qiimaynta Goobida iyo Samatabbixinta ee CERT

Step 1: Gather Facts

Tillaabo 1: Run Ururso

Waqti

- Miyay waqtiga maalinka ee la joogo iyo kan toddobaadka toddobaadku saamaynayaan dedaallada goobidda iyo samatabbixinta?

Sidee?

Nooca Dhismaha

- Nooc ee (yadee) dhisme (yaal) ah oo ku tacalluqda hawshan?
- Nooc ee (yadee) bay yihiin habka ay u dhisan yihiin dhismayaasha ku tacalluqda hawshan?

In la Deggan Yahay

- Dhismayasha ma lagu jiraa/deggan yahay?
Haddii ay haa tahay, intee qof baa laga yaabaa in ay saamayso arrintani?
- Ma jiraan tixgelinno khaas ah (tus. Carruur, waayeel)?
Hadday haa tahay waa maxay tixgelinnada khaaska ahi?



PM, P. 5-4

Tiglaha Qiimaynta Goobida iyo Samatabbixinta ee CERT

Haa

Maya

Tillaabo 1: Run Ururso (Weli Socota)

Cimilo

- Miyay xaaladaha cimiladu saamaynayaan nabdoonaantaada?

Hadday haa tahay, sidee nabdoonaantaadu u saamoobi doontaa?

- Miyay xaaladaha cimiladu saamaynayaan xaaladda goobidda iyo samatabbixinta?

Hadday haa tahay, sidee xaaladda goobidda iyo samatabbixintu u saamoobi doontaa?

Khataraha

- Miyay maaddo halis ahi ku lug leedahay?

Hadday haa tahay, maaddadee khatar ah oo meesha ku lug leh?

- Miyay khataro kale u badan tahay in ay meesha soo geli doonaan?

Hadday haa tahay, khatartee?

Haa

Maya

Tallaabo 2: Qiimee oo Sheeg Burburka

- Ku soo jiiree dhismaha. Miyay khatartu tahay mid ka duruqsan awoodda kooxda CERT?

Hadday haa tahay, shuruudahee gaar ah ama istaahilladee loo baahan yahay?

- Miyay khadadka war-is-gaarsiinta ee caadiga ahu shaqayaan?

Tallaabo 3: Tixgeli Waxyaabaha Dhici Kara

Khatar Nafeed

- Ma khataro naf-gooyo ahaa jira?

Hadday haa tahay, waa maxay khatartu?

Burburroo Dheeraad ah

- Ma waxaa jira khatar weyn ama filasho hawlo musiibo oo saamayn ku yeelan kara nabdoonaanta qofka?

Haday haa tahay, waa maxay khataraha la og yahay?

Tallaabo 4: Qiimee Xaaladdaada

- Maxaa agab ah ee aad haysataa oo aad iskula deyi kartaa in aad isku daydo goobid iyo samatabbixin?
- Qalabkee la heli karaa?



PM, P. 5-6

Tiglaha Qiimaynta Goobida iyo Samatabbixinta ee CERT

	Haa	No
Tallaabo 5: Deji Muhiimado		
<ul style="list-style-type: none">Miyay xubnaha CERT si <i>nabdoon</i> isugu dayi karaan in ay goobid iyo samatabbixin sameeyaan? <p>Haddii ay maya tahay, <i>ha isku</i> deyin goobid iyo samatabbixin.</p>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
<ul style="list-style-type: none">Miyay haatan jiraan baahiyo aad uga muhiimsan kuwan? <p>Haddii ay haa tahay, tax.</p>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Talaabo 6: Go'aanno Qaado		
<ul style="list-style-type: none">Xaggee bay geynta agabka la hayo ka tari kartaa waxa ugu fiican iyadoo la ilaalinayo xuduud ku filan oo bedbaadada xaggeeda ah?		
Tallaabo 7: Diyaari Qorshe Ficil		
<ul style="list-style-type: none">Go'aanso sida shaqaalaha iyo agabka kaleba loo geynayo meesha.		



PM, P. 5-7

Tiglaha Qiimaynta Goobida iyo Samatabbixinta ee CERT

Step 8: Take Action

Tallaabo 8: Ficil Samee

- Qorshaha hawlgeli.

Tallaabo 9: Qaymee Horumarka

- Si isxig-xigta u qiimee xaaladda oo ogow isbeddelka ka dhacay:
 - Xadka ay gaarayo dhibaataadu.
 - Khataraha ku imanaya bedbaadada.
 - Agabka iyo helitaankiisa.
- U dheellitir tabaha sidii loo baahdo.



BANDHIG
TALLAABO 1



MUUQAAL 5.7



XUSUUSINTA
MACALLINKA

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)

TALLAABO 1: XAQIIQO URURI

Ku billow Tallaabo 1 adigoo kooxda xusuusinaya in ay tahay in xaqiiqooyinka xaaladdu ay hagaan dedaalladaada goobidda iyo samatabbixinta.

Tallaabo 1: Xaqiiqo Ururi

Tixgeli:

- Waqtiga dhacdada iyo maalinta toddobaadka.
- Nooca dhismaha/meesha.
- Sida loo dhisay.
- Cimilada.
- Khataraha.

Xaqiiqooyinka u ururso si saxan.

Muuqaal 5.7

Markay xaqiiqooyinka ururinayaan, xubnaha CERT waxay u baahan yihiin in ay tixgeliyaan:

- Waqtiga dhacdada iyo maalinta toddobaadka. Habeenkii , dad badan ayaa guryahooda jooga, marka baahida ugu badan ee goobid iyo samatabbixin waxay ka jirtaa meelaha la deggan yahay. Ka soo horjeedka taa, maalintii dadku waa ay shaqaynayaan, sidaa darteed baahidu waxay noqonaysaa dhismayaasha ganacsiga.

Qaar ka mid ah adeegyada gurmada ayaan la heli karayn—ama uma yaallaan si isla eg—inta lagu jiro fiidadkii iyo dhamaadka toddobaayada. Goobidda iyo samatabbixinta waxaa kale oo saamayn kara meesha ay dadku ka joogaan guryahooda iyo inta iftiin maalmeed ah ee la heli karo.

Bixi oo ka hadal tusaalayaal maxalli ah oo saameeyayaal diyaargatoobid ah leh si aad saameeye kasta ugu samaysid faham ay fahmaan saamaynta uu yeelan karo.

- Nooca dhismaha. Ujeeddada dhismaha loo naqshadeeyey ayaa muujin karta tirada laga yaabo in ay dhibbanayaashu la eg yihiin, iyo meelaha ay joogaan.
- Sida loo dhisay. Noocyo ka mid ah kuwa dhismayaasha loo dhiso, ayaa burbur uga sahlan kuwa kale.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)

Sheeg in cadadka burbur ee ay u badan tahay in laga helo nooc kasta oo dhisme ah in dhawr daqiiqo gudahood laga hadli doono.

- Cimilada. Cimilada daran waxaa hubaal ah in ay saamayn ku yeelanayso dhibbanayaasha iyo samatabbixiyeyaasha si isku mid ah. Saadaalaha cimilo daran waa in loo qaataa saameeyaha xaddida waqtiga la gudanayo hawsha goobid iyo samatabbixin.
- Khataraha. Ogaanshaha halis kale oo suuroggal ah oo ka dhacaysaa aagga guud ama meelaha gaarkas ah waa mid aad muhiim u ah dedaallada goobidda iyo samatabbixinta. Waqtiga lagu lumiyo in la isku dayo in la helo oo la demiyo yutiilida, tusaale ahaan, waxay yeelan kartaa saamayn wanaagsan marka la eego geerida nafeed.

Adkee baahida loo qabo xog uruursi dhab ah inta aan laysku deyin in la qiimeeyo burburka.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

Tilmaan in marka qodobkan la joogo ee qaymanyntana lagu jiro, xubnaha CERT waa in ay fikir wanaagsan ka haystaan haddii ay dhacdadani sababtay tallaabo argaggixisannimo. Adkee in xubnaha CERT aanay abid billaabi karayn hawlaha goobid iyo samatabbixin haddii ay tuhmaan in:

- Hub bayooloji, kiimiko ama shucaac (raadiyooloji) la isticmaalay.
- Ay dhismaha ku jiri karaan aalad qarax labaad samayn karaysa.

Adkee in haddii uu suuraggal yahay weerar argaggixiso, in ay markiiba aagga ka tagaan.



QABO LAYLI



PM, P. 5-10



**XUSUUSINTA
MACALLINKA**



**DIWAANGELI
JAWAABAHA**

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)

LAYLI: URURSIGA XOGTA

Ujeedo: Layligani waa hawl wadaqabasho ah oo ku siinaysa fursad aad uga fikiri kartid qar ka mid ah xaqiiqooyinka ay kooxda goobidda iyo samatabbixinta ee CERT u baahan doonaan in ay helaan xilliga ay qiimaynta samaynayaan.

Tilmaamaha: Isticmaal tallaabooyinka soo socda si aad layligan u dhamaystirto:

1. U dir ka qaybgalayaasha *Sinnaariyo* oo ku taal Buugga Ardayga.

Sinnaariyadani waa tusaale: Waa inaad khiyaar u leedahay in aad beddesho sinnaariyada si ay ugu ekaato baahida bulshada.

2. Weydiiso kooxda in ay maskaxda uga shaqaysiiyaan su'aalaha soo socda:
 - Maxay seenyadan kaaga sheegaysaa xaqiiqooyinka ay tahay in la urursho?
 - Maxaa saamayn ah oo ay xaqiiqooyinkani ku yeelanayaan hawlgallada goobidda iyo samatabbixinta?
3. Ku dul qor jawaabaha kooxda waraaq weyn.
4. Ka wada hadla jawaabaha kooxda oo sii falcelintaada ku saabsan sidii qorshayntooda loo xoojin lahaa.



PM, P. 5-10

Sinnaariyo (seenyo)

Markuu waqtigu ahaa 2:30 p.m., Talaadadii ay Agoosto ahayd 9, xarriiq taluuliye ah ayaa gudbay magaaladaada. Iyadoo ay u sabab tahay xajmiga iyo cadaadiska labada dhinac ee wajhadda oo kala duwan xarriiqa taluuliyaha waxaa ka horreeyey “geyre xooggan” oo ay sidaan dabaylo toosane ah oo ku socda 70 mayl saacaddii ama ka badan. Gerihii xoogganaa waxaa ku xigsaday dabayl negaatay iyo roob aad u xoog badan. Korantadii waa ay ka go’day magaalada oo dhan.

Waxaad hawlgelisay CERT adigoo ku camalfalaya halbeegyada hannaanka hawlgelinta (SOPs). Adigoo ku sii socda goobta diyaar-garowga oo dugsi sare ee maxalli ah ku taal, ayaad aragtay burbur weyn, oo ay ka mid yihiin geedo iyo fiilooyinkii yutiilida oo dumay. Jidad badan ayaan la mari karin, taas oo kugu khasabtay in aad wareeg marto si aad dugsigii sare u gaarto. Adigoo u dhaqaaqay dhinaca goobta diyaar-garowga, waxaad aragtay in uu saqafku ka duulay qayb dhan oo ka mid ah xarun iibsi oo dukaamada yaryar oo safan ah, iyo weliba derbigii kore ee dhinaca galbeed ee dhismuhu uu soo dumay.

Ka dib markaad gaartey kobta diyaar-garowga, waxaad iska xaadirisay Hoggaamiyaha Kooxda Sahayda oo kuu xilsaaray Kooxda 2aad ee Goobidda iyo Samatobbixinta. Walow aanay kooxaha CERT isku biimayn karin qaybta xarunta iibsiga ah oo duntay Kooxda 2aad ee Goobidda iyo Samatobbixinta waxay goobitaan ku samayn doonaan aagga dumay agtiisa si ay u hubiyaan in aysan aaggaa ku jirin wax dhibbaneyaal ah.

Su’aalo:

1. Maxay seenyadani kaaga sheegaysaa inta ay daadsan tahay carrada ay musiibadu saamaysay?
2. Maxay seenyadani kaaga sheegaysaa xaqiiqada ay tahay in la uruuriyo?



XUSUUSINTA
MACALLINKA



SOO BANDHIG
TALLAABO 2



MUUQAAL 5.8

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)

TALLAABO 2: QIIMEE OO GUDBI DHIBAATADA

Xogta soo socota ee ku saabsan burburka dhici kara, iyo shaxda, *Darraanta Dhici Karta iyo Nooca Burburka oo ku Salaysan Nooca Dhismaha*, oo ku yaal bogga 5-12 ee Buugga Ardayga wuxuu ku tacalluqaa dhulgariirrada. Haddii nooc kale oo musiibo ah (sida, toornaado, harikeyn, ama daadad) ay u badan tahay in ay ka dhacdo aaggaaga, hel oo xog ku saabsan waxay ku sababi karaan noocyada kala duwan ee dhismayaasha ah iyo waxaad u qaadan lahayd burbur khafiif ah, mid dhexe iyo mid culus oo gaara dhismayaasha.

Ku billow Tallaabo 2 adigoo tilmaamaya in ay jiraan tilmaamo guud oo lagu qiimeeyo dhibaataada. Markii aad ka shakido xaaladda dhisme, xubnaha CERT waa in ay mar waliba isticmaalaan qiimaynta xaddidan. Tusaale ahaan, haddii aadan hubin in uu dhisme gaaray dhib fudud ama mid culus, waxaad u qaadataa in ay dhibaato culus gaartay. Adkee, si kastaba ha noqotee in himilada CERT ay isla beddesho dhibka meel dhisme ah soo gaarey.

Tallaabo 2: Qiimee oo Gudbi dhibaataada

Hawlqabadka CERT waa isbeddelayaa haddii:

- Burburku khafiif yahay.
- Burburku dhexdhexaad yahay.
- Burburku culus yahay.
Tixgeli nooca iyo da'da dhismaha.

Abid ha gelin dhisme burbur culus leh!

Muuqaal 5.8

Sharax sida uu hawlqabadka CERT isu beddelayo:

- Burburku khafiif yahay (burbur naqshadda iyo qurxinta guriga ah, ama dhoob jabay ama dillaacay, burbur yar oo aaladda gudaha ah) . . .
. . . Hawsha CERT waa in ay helaan (dhibbanaha), kala-soocaan, uu muhiimado kala siiyaan qaadidda dhibbaneyaasha.

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)

- Haddii uu burburku dhexdhexaad yahay waxaa laga helaa calaamado muuqda oo burbur ah, waxyaabihii guriga lagu qorxiyey oo burburay ama soo dhacay, dil-dillaacyo badan oo malaaska lagu arki karo, jug weyn oo gaartey wixii ku jirey, dhismuhuse asaaskiisuu ku taagan yahay.) . . .

. . . Hawsha CERT waa Helid, dejin, iyo degdeg u bixin dhibbaneyaasha marka loo qaado meel nabdoon iyadoo la yaraynayo tirada samatabbixiyeyaasha ah eek u jirta gudaha dhismaha.

- Hadduu burburku culus yahay waxaa laga helaa dumid qayb ah ama dhan, dheellin, gurigii oo si muuqda u ruxma, dab ama qiiq weyn, gudaha oo ay maaddooyin halis ah ku jiraan, gaas liigaya, biyo sare-kacaya ama soconaya.) . . .

. . . Hawshaa CERT marka waxa weeye sugidda xayndaabka dhismaha iyo uga digidda dadka kale khatarta ay leedahay gelidda dhismaha..



MUUQAAL 5.9

Qiimaynta Goobidda iyo Samatabbixinta

Burbur Yar

Muuqaal 5.9

Tilmaan noocyada burbur ee ku yaal Muuqaal 5.9. Sharax sababta burburka sawirkan ka muuqda uu u metelo burbur yar:

- Burbur guudka sare ah.
- Daaqado jajabay.
- Malaas soo dhacay ama dil-dillaacay.
- Burbur yar oo ku yimid waxyaabaha gudaha ku jira.



MUUQAAL 5.10

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)

Qiimaynta Goobidda iyo Samatabbixinta

Burbur Dhexdhexaad ah

Muuqaal 5.10


Tilmaan noocyada burbur ee ku yaal Muuqaal 5.10. Sharax sababta burburka sawirkan ka muuqda uu u metelo burbur dhexdhexaad ah:

- Calaamado muuqda oo burbur ah.
- Waxyaabihii guriga lagu qorxiyey oo burburay ama soo dhacay.
- Dil-dillaacyo badan oo malaaska lagu arki karo.
- Burbur lixaad leh oo gaara waxyaabaha gudaha ku jira.
- Asaaskiisii buu dhismuhu ku taagan yahay



MUUQAAL 5.11

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)



Tilmaan noocyada burbur ee ku yaal Muuqaal 5.11. Sharax sababta burburka sawirkan ka muuqda uu u metelo burbur culus:

- Dumid qayb ah ama dhan.
- Dheellin.
- Gurigii oo si muuqda u ruxma.
- Gurigii oo aan asaaskiisa ku taagneyn

Uga dig ka qaybgalayaasha in aanay gelin dhisme uu gaaray burbur culus duruuf kastaa ha jireene.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

Sheeg in xisadda tan xigta ay ka qaybgalayaashu wax ka baran doonaan samaynta tabaha samatabbixinta oo ku salaysan qiimaynta burburka.

Ku adkee ka qaybgalayaasha in ay dhinac kasta ka eegaan dhismaha iyagoo samaynaya "ku soo wareegid."

Adkee in ka qaybgalayaashu ay u gudbiyaan waxay soo ogaadeen barta taliska ee CERT ama hay'adaha arrinta wax ka qabanaya.

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)

Kooxda u sheeg in ka dib— ama inta ay socoto— qiimaynta burburka, shaqaalaha CERT ay tahay in ay ka fikiraan inta uu gaarsiisnaan karo burburka iyagoo eegaya nooca iyo da'da dhismaha. Sharax in shaqaalaha khibrada leh ee goobidda iyo samatabbixintu ay garan karaan burburka dhisme gaaray iyagoo ka jaanqaadaya dhacdada iyo noocyada dhisme ee ay wax gaareen.

TALLAABO 3: KA FIKIR WAXYAABAHA DHICI KARA

Adkee in maaddaama ay CERT ka shaqayn doonaan meel aad ugu dhaw meesha ay dhibaataadu ka dhacday, ka fikiridda maxaa laga yaabaa in ay dhacaan iyo waxa dhici karay aad inay aad muhiim u yihiin. Ku dhiirrigeli ka qaybgalayaasha in ay aqoonsadaan khataro naf-gooyo keeni kara, iyagoo aad u eegaya:

- Ilaa intee bay runtii xaaladdu deggan tahay. Xitaa dhisme kor uga muuqda in ay gaareen wax aan saa u badnayn, burburka ku dhaca meelaha dululaatiga ah ama degganaansho la'aan gudaha dhismaha ah ayaa waxay khatar dhab ah u keeni karaan kooxda samatabbixinta. Xubnaha CERT waa in ay ka fikiraan wixii ay horeba uga ogaayeen dhismaha haatan burburay. Miyaa kiimikada caws-deydka, riinji, ama maaddooyin kale oo halis ah lagu keydinayey dhismaha? Sidee loo xareyn jirey, xaggee yaallaan? Wax badan ku qaadan mayso xubnaha CERT in ay su'aalaha caynkaa ah ka jawabaan, laakiin jawaabaha ayaa saamayn aad u weyn ku yeelan karta sida ay u waajahayaan goobidda.
- Maxaa kale oo khaldami kara. Iyadoo lagu salaynayo xogta la ururiyey intii lagu jirey tallaabo 1 iyo 2 oo qiimaynta ah, xubnaha CERT waa in ay is weydiyaan, “maxaa dhacaya haddii?” si ay isugu dayaan in ay ogaadaan khataraha dheeraadka ah ee ay waajihi karaan. Maxaa dhacaya haddii ay korantadu tagto innagoo ku jirra goobidda? Maxaa dhacaya haddii derbigan adayga u muuqda uu liiqliiqdo oo dumo? Ku dabbakhhidda xaaladda “Sharciga Murphy” wuxuu bedbaadin karaa nolosha kooxda CERT.
- Maxay hawshayadu ugu fadhidaa goobidda iyo samatabbixinta. Iyadoo lagu salaynayo waxyaabaha dhici kara, CERTyadu waa in ay ka fikiraan waxa ay qaban karaan si ay u yareeyaan khataro ku tacalluqda ixtimaallada ay aqoonsadeen. Ma loo baahan yahay dhawre la socda dhaqdhaqaaq muujinaya dumid suuroggal ah oo markaa

kooxda samatabbixinta u diga? Ma jiraan la tacaalido kale oo loo baahan yahay in uu dejiyo khataraha dululaatiga intaan goobidda la billaabin. Kooxaha CERT ee goobidda iyo samatabbixintu waa inay xusuustaan in ay nabdoonaantoodu tahay muhiimadda koowaad.

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)

TALLAABO 4: QIIMEE XAALADDAADA

U sheeg ka qaybgalayaasha in ay qiimayntu tahay hannaan koraya, oo ay tallaabo xoojinayso kuwii ka horreeyey ilaa inta laga qaadanayo go'aan ama lagu billaabo goobid iyo samatabbixin ah (ama ay xaaladdu khatar tahay). Marka u sheeg ka qaybgalayaasha in ay sawirtaan wax kasta oo ay barten min tallaabadii 1 ilaa 3 si ay u qiimeeyaan go'aan uga gaadhaan:

- Hadday xaaladdu tahay mid nabdoon oo laga hawlgeli karo.
- Khataraha ay samatabbixiyeyaashu wajahayaan haddii ay hawsha bilaabaan.
- Maxaa sahay ah oo hawsha wadiddeeda loogu baahan doonaa si hawshu dhamaato (maxaase sahay ah oo la hayaa).

Tilmaan in qiimaynta sahayda ay aad muhiim ugu tahay hawlaha goobidda yo

Markaad ka hadlaysid “sahay,” maxaad ula jeeddaa?

Aqoonso jawaabaha kooxda.

U dir ka qaybgalayaasha shaxda la cinwaankeedu yahay, *Su'aalaha Qorshaynta Sahayda Goobidda iyo Samatabbixinta*, oo ku yaal Buugga Ardayga.



WEYDII SU'AAL



PM, P. 5-15

**KOOXDA KAJAWAABIDDA XAALADDA DEGDEGGA AH EE BULSHADA
CUTUB 5: HAWLGALLADA GOOBIDDA IYO SAMATABBIXINTA YARYAR**



PM, P. 5-15

Su'aalaha Qorshaynta Sahayda Goobidda iyo Samatabbixinta

Sahayda	Su'aalaha Qorshaynta
Shaqaaale	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Yaa ku nool/ama ka shaqeeya aagga? ▪ Waqtigee bay dadkaasi u badan tahay in la heli karo? ▪ Maxaa xirfad ah ama hiwaayad ah oo ay leeyihiin oo muhim u noqon kara hawlgallada goobidda iyo samatabbixinta? ▪ Maxay tahay tabta ugu wanaagsan oo dedaalkooda loo midayn karo oo loo wada hawlgelin karo?
Qalab	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Maxaa qalab ah oo muhiim u noqon kara goobidda iyo samatabbixinta oo deegaanka laga heli karaa? ▪ Xaggee yaalliin? ▪ Sidee loo heli karaa? ▪ Dhismayaalkee (ama dhismayaal caynkee ah) bay aad wax uga tari kari lahaayeen?
Gacan-qabsi	<ul style="list-style-type: none"> ▪ Maxaa gacan-qabsi ah oo la heli karaa oo wax ka geli kara qaadidda, dhaqaajinta, goynta, ama jaridda qashinka burburka?



MUUQAAL 5.12

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)

Qiimaynta Goobid iyo Samatabbixin

- Shaqaale
- Gacan qabsi
- Qalab

Muuqaal 5.12

U sheeg kooxda in sahayda (iyo shaqaalaha) goobidda iyo samatabbixintu ay ka mid yihiin:

- Shaqaale. Yaa ku nool/ama ka shaqeeya aagga? Waqtigeed bay dadkaasi u badan tahay in la heli karo? Maxaa xirfad ah ama hiwaayad ah oo ay leeyihiin oo muhim u noqon kara hawlgallada goobidda iyo samatabbixinta? Maxay tahay tabta ugu wanaagsan oo dedaalkooda loo midayn karo oo loo wada hawlgelin karo? Adoo ku tashanaya shaqaalaha la heli karo oo xitaa ay meesha ilaalin karaan iyagoo markaa dadka CERT ee xirfadda u lahaa waxyaabaha khaaska ah firaaqo u abuuraya, ayaa waxay goobidda iyo samatabbixinta ka dhigi kartaa mid sii wanaagsan
- Gacan qabsi. Maxaa gacan-qabsi ah oo la heli karaa oo wax ka geli kara qaadidda, dhaqaajinta, goynta, ama jaridda qashinka burburka?
- Qalab. Maxaa qalab ah oo muhiim u noqon kara goobidda iyo samatabbixinta oo deegaanka laga heli karaa? Xaggee yaalliin? Sidee loo heli karaa? Dhismayaalkeed (ama dhismayaal caynkeed ah) bay aad wax uga tari kari lahaayeen?

Sii ka qaybgalayaasha tusaaleyaal qalabyo iyo gacan qabsi ah oo ay ugu baahan karaan goobidda iyo samatabbixinta.

Tilmaan in ka fikiridda dhamaan su'aalahan ay sahlayso qorshaynta hawlgabada.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)

TALLAABO 5: SAMAYSO MUHIIMADO

Ku billow tallaabadan adigoo kooxda u sheegaya in ka dib qiimaynta xaaladda, ay tallaabada xigta tahay in la go'aamiyo:

- Maxay tahay in la qabto. . .
- Sidee loo kala hormarinayaa.

Xusuusi kooxda in nabdoonanta xubnaha CERT ay mar kasta yihiin muhiimadda koowaad iyagana looga shidaal qaadanayo muhiimadaha kale qaar ka mid ah. Tusaale ahaan, fogeynta ama halis-dhimidda khataraha la og yahay waa in la dhamaystiraa inta aanay kooxuhu raadintaba billaabin. Ku dhiirri ka qaybgalayaasha in ay si macquul ah uga fikiraan xaaladda si ay u go'aansadaan sida ay tahay in ay xaaladda u wajahaan.

TILLAABO 6: GO'AANNO GAAR

U sheeg kooxda in ay marayaan meeshii qiimaynta ee ay uga go'aan qaadan lahaayeen meeshii ay geyn lahaayeen waxtarkooda oo uu markaa ka qaban lahaa wanaagga ugu badan, iyagoo markaa dhawraya nabdoonaan iyaga ku filan. U soo jeedi in in badan oo go'aannadooda ka mid ah ay ku salaysnaan doonaan muhiimadaha ay dejiyaan inta ay ku jiraan tallaabada 5aad. Muhiimadahaasi waxay ku salaysnaan doonaan (si isku xigta):

1. Nabdoonaanta xubnaha CERT.
2. Nabdoonaanta nafeed ee dhibbanayaasha iyo dadka kale.
3. Ilaalinta bay'adda.
4. Ilaalinta hantida.

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)

TALLAABO 7: HAGAAJII QORSHE FICIL

U sheeg kooxda in tallaabo 7 ay tahay meesha xogta ay xaaladda ka hayaan oo dhan ay isugu yimaadaan. Inta lagu jiro tallaabo 7, hoggaamiyaha kooxda ayaa si khaas ah u go'aansanaya sida ay kooxdu hawleheeda u qabsanayso, iyadoo muhiimadda ugu sarraysa la xallinayo marka koowaad.

Xusuusi ka qaybgalayaasha in qorshayaasha ficileed aan loo baahnayn in la qoro, laakiin, u sheeg in markii loo baahdo hawlgal goobid iyo samatabbixin ah, xaaladdu ay qallafsan tahay oo loo baahan yahay in la sameeyo walax bartood oo ah qorshe qoran. Tilmaan in xitaa qorshe sahlan oo qoran uu:

- Wax ka galo in hawlgalka lala beegsado muhiimadaha degsan iyo go'aamada.
- Bixiyo waraaqo la siiyo hay'adaha waxqabanaya markii ay meesha musiibada yimaadaan.
- Bixiyo waraaqo la isticmaali karo, haddii loo baahdo, dhacdada ka gadaal.

U sheeg kooxda in ay haystaan xusuus qor ay ku xarriiqdaan xusuusahooda markii ay hagaajinayaan qorshe ficil. Xusuusahaa qoran waa in ay ku jiraan isbeddellada lagu sameeyey qorshaha oo ku salaysan xogta cusub oo markaa timaadda.

Tilmaan in qorshaha la hagaajiyey intii lagu jirey tallaabo 7 ficil loogu rogo inta lagu jiro tallaabo 8. Sii wad in aad adkaysid in Tallaabo 9, Qiimee Horumarka, ay tahay tan aad ugu muhiimsan, keliya maaha qiimaynta in qorshuhu shaqaynayo iyo in kale, ee weliba mawqifka ku aaddan nabdoonaanta.

Sidoo kale xusuusi kooxda in qiimayntu ay tahay mid socota. Xogta la helo inta lagu jiro tallaabo 9 ayay tahay in lagu caano qaybsado inta lagu jiro hannaanka go'aan qaadashada ah iyadoo la eegayo in wax laga beddeli karo muhiimadaha yaalla iyo qorshe ficil oo joogtaysan.

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)

TIXGELINNO NABDOONAANTA KU SAABSAN

U sheeg kooxda in iyadoo an la eegayn darraanta burburka dhismaha, nabdoonaanta samatabbixiyaha ay noqotaa noqotaa welwelka koowaad.

Tilmaan in inta badan labada ugu badan ee samatabbixiyeyaashu ay u dhintaan ay yihiin:

- Digtooni xumo.
- Dumid labaad.



MUUQAAL 5.13

Tixgelinno Nabdoonaanta ku Saabsan

- Ka dhig nabdoonaanta samatabbixiyaha walaacaaga koowaad.
- Istimaal hab jaallennimo.
- Ka digtoonow khataraha.
- Istimaal qalabka nabdoonaanta.
- Hays bed-beddeleen kooxuhu.

Wadashaqayn = Guul

Muuqaal 5.13



PM, P. 5-17



XUSUUSINTA
MACALLINKA

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)

U dir ka qaybgalayaasha *Tixgelinnada Nabdoonaanta* oo ku taal Buugga Ardayga. Ku dardaarmi kooxda in ay raacaan tilmaamahan inta lagu jiro hawlgallada goobidda iyo samatabbixinta oo dhan:

- Isticmaal hab jaallennimo. Mar kasta la shaqee wheel, iyadoo uu qof saddexaad yahay wargeeye.
- Ka digtoonow khataraha (sida., fiilooyinka korantada, liigidda gaaska dabiiciga ah, maaddooyinka halista ah, walxaha fiiqan, iwm.).

Uga dig kooxda in aanay weligood wax ka goobin meel ay biyo la yaallaan.

- Isticmaal qalab nabdoonaaneed. Xirashada galoofyada iyo halmadka waxay ilaaliyaan madaxa iyo gacmaha samatabbixiyaha. Sidoo kale, dhibka koowaad eek u dhaca samatabbixiye ka dib markii uu ka shaqeeyo dhisme dumay waa in uu siigo jiido, marka maaskarada siigada waa muhiim.

U sheeg kooxda in maaskaraha uusan celin karin ashya'a da aadka u khafiifka ah, maaddooyinka kiimikaad iyo baayoolojina ma celin karaan. Adkee in haddii laga shakiyo maaddooyinka kiimikaad iyo bayooloji, CERTyadu waa in ay u guuraan meel urkoraad ah aanay wargeliyaan ka jawaabayaasha xaaladda degdegga ah ee koowaad.

- Koox qurmad ahi ha kuu jirto si loo helo kooxo isbedbeddela, iska dhawrida daalka, iyo in la xaqiijiyo in kaalmo la helo haddii uu dhib yimaado. Kooxuhu ha cabbeen biyo hana cuneen cunto si ay u ahaadaan kuwo nashaad leh.

Kooxda xusuusi in goobid iyo samatabbixin guul leh ay ku xiran yihiin wadashaqaynta kooxaha.



LAYLI QABO



XUSUUSINTA
MACALLINKA



SHEEG WAX
DHICI KARA
(SEENYO)



DIWAANGELI
JAWAABAHA

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)

LAYLI: QIIMAYNTA GOOBIDDA IYO SAMATABBIXINTA

Ujeedo: Layligani waa hawl la wada qabanayo si lagu siiyo fursad aad u muraajicayso qaar ka mid ah hannaanka fikiridda oo ku shaqo leh qorshaynta qiimaynta goobidda iyo samatabbixinta. Maskax ka shaqaysiinta loo baahan yahay waxay kaa caawin kartaa in aad billowdo qiimaynta derisyadaada iyo goobta shaqada oo kala ah meelaha dhisan, maaddoyinka halista ah, taxaddarrada dhinaca nabad gelyada oo ay tahay in sameeyo, iwm. Layligani wuxuu ku salaysnaan doonaa dhawr nooc oo dhismayaal degaanka ku yaalla ah oo kala duwan (kox kasta oo yar midkood) iyadoo la dabbakhayo musiibooyinka ay ugu badan tahay in ay umaddani ku dhici karaan.

Tus muuqaallada dhismayaasha maxalliga ah si aad u kordhiso run u ekaanshaha seenyada.

Tilmaamaha: Isticmaal tallaabooyinka soo socda si aad u dhamayso layligan:

1. Ka dhig ka qaybgalayaasha kooxo afar afar ama shan shan ah.
2. Koox kasta sii seenyo (wax dhici kara) oo maxalli ah (oo sawirro leh, hadday suuroggal tahay) oo sheegaya dhisme ay yaqaanniin oo ay ku habsatay dhacdo ka dhici karta bulshadan.
3. Weydiiso kooxaha in ay qabsadaan diwaanshe, oo markaa iyagoo maskaxda ku haya musiibada iyo dhismahan gaarka ah, ay ka jawaabaan su'aalaha soo socda:
 - Maxay tahay xaqiiqooyinka muhiimka ah oo ay tahay in la ururiyo?
 - Noocee qiyaas ah oo aad samayn kartaa oo ku saabsan burburka, adigoo ku salaynaya dhacdada iyo nooca dhismaha?
 - Goobid iyo samatabbixin caynkee ahaad halkan ka aqoonsan kartaa samaynteeda?
 - Maxaa tixgelin gaar ah ahood haatan aqoonsan kartaa?
4. Koox kastaa weydiiso in ay samaystaan af-hayeen fasalka u jeedsha jawaabaha kooxda.
5. Ka hadal jawaabta koox kasta, siina falcelin ku saabsan sida xirfadahooda qiimaynta goobidda iyo samatabbixinta loo hagaajin karo.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

QIIMAYNTA GOOBID IYO SAMATABBIXIN (WELI SOCDA)

Weydii kooxda haddii uu jiro qof wax su'aalo ah oo ku saabsan wax kasta oo hadda ka hor xisaddan lagu soo sheegay qaba.

Sharax in xisadda tan ku xigta ay ka hadli doonto sida loo sameeyo hawlgalaada goobidida.



BANDHIG
MAWDUUCA



MUUQAAL 5.14

SAMAYNTA HAWLGALKA GOOBIDDA

Samaynta Hawlgalka Goobidda

Baar aagga adigoo:

1. Adeegsanaya tabaha ku salaysan qiimaynta.
2. Helidda dhibbanayaasha.

Muuqaal 5.14

U sheeg ka qaybgalayaasha in markii go'aan lagu gaaro in lagu dhaqaaqo hawlgal goobid ah, xubnaha CERT ay tahay in ay baaraan aagga uu u qoondeeyey Taliyaha Aagga ee Kooxda CERT.

Sharax in hawlgallada goobiddu ay ku lug leeyihiin laba hannaan:

1. Isticmaalidda tabo goobitaaneed oo ku salaysan qiimayntii
2. Helidda dhibbaanayaasha suuraggalka ah

Tilmaan in iyagoo isticmaalaya hannannadaas, hawlgallada goobiddu ay noqonayaan kuwo waxgal ah, dhamaystiran, oo nabdoon. Waxaa kale oo ay sahlayaan hawlgallada dambe ee samatabixinta. Sharax in in kastoo ay hannaannadu xiriir leeyihiin, qaybtani ay midba mar ka hadli doonto.

HELIDDA DHIBBANEYAASHA SUURAGGALKA AH

U sheeg ka qaybgalayaasha in tallaabada kowaad ee helidda dhibbanayaasha suuroggalka ah ay tahay in la qiimeeyo xaaladda ka jirta gudaha dhismaha si loo helo xog aad dhab u ah oo ku saabsan burburka iyo in la sameeyo muhiimado iyo qorsheyaal.

Sharax adigoo oranaya in macluumaadka la uruuriyey ay xog badan oo ku saabsan dabinnada— iyo hulalka bixin doonaan.



BANDHIG
HELIDDA DADKA
DHAAWACA
AHAAN KARA



XUSUUSINTA
MACALLINKA



PM, PP. 5-19 &
5-20



XUSUUSINTA
MACALLINKA



MUUQAAL 5.15

SAMAYNTA HAWLGALKA GOOBIDDA (WELI SOCOTA)

Bixi tusaaleyaal ku saabsan sida loo isticmaalo xogta la ururshay si xog kale looga ogaado aagagga dabinnada.

Tilmaan in ay jiraan dhawr nooc oo hulan ah:

U dir ka qaybgalayaasha jaantuska cinwaankiisu yahay *Hulalka*, ee ku yaal Buugga Ardayga, kana sheeke nooc kasta oo hulan ah.

Haddaad doonto isticmaal muujin muuqaal si aad u muujiso saamaynaha dhawrka ah ee dumnidda dhismaha. *Lincoln Log-yada* ama baloogyada dhismaha ayaa si gaar ah u ah qalab muujineed oo fiican.

Samaynta Hawlgalka Goobidda

Hulka Baankeegga

Muuqaal 5.15


Sharax in Hulalka baankeeg ay yihiin kuwa ugu badan oo ku dhaca dhismayaasha la dhisay ka hor 1933. Waxay ku samaysmaan marka ay daciifaan ama dumaan derbiyada culaysku saaran yahay taasoo keenta in ay falaatyadu dabaqu isku soo dumaan. Hulalka baankeeggu waxay u baahan yihiin goobidda ugu dhib badan waqtigana aad bay u lumisaa.

Xusuusi kooxda khataraha ay leeyihiin dhismayaasha aan xagsanayn. Adkee in haddii ay xubnaha CERT arkaan hulan baankeeg ah, tani waxaa loo tixgeliyaa in ay tahay burbur xooggan waana in ay markiiba meesha ka baxaan.




PM, P. 5-19 &
5-20

Hulalka




Hulka Baankeegga

Hulka Baankeeg oo ay falaatyadu si isku aaddan ugu soo dumeen, oo ka samaynaysa hulal meelo ay gidaarrada iyo dhulku weli iska haystaan.



Hul Tiirsama

Hul Tiirsama oo derbigii dumay uu ku tiirsan yahay derbi dibedda ah, oo hul ka sameeyey meeshii uu falaatku uga dhegganaa derbiga..



Hulka "V"

Hulka "V" oo ay falaatka ama derbigu ku soo dheceen batamaha dhismaha oo ay hulal ku sameeyeen labada dhinac ee derbiyada.



XUSUUSINTA
MACALLINKA



MUUQAAL 5.16

SAMAYNTA HAWLGALKA GOOBIDDA (WELI SOCOTA)

Bixi dhawr tusaale oo hulalka baankeegga ah oo ku dhacay dhisme aan ahayn ka hor 1933. Tusaale ahaan:

- Dumiddii buundada ee Oakland intuu socda Dhulgariirkii Loma Prieta.
- Dumiddii guryaha degaanka eek u xigtay Dhulgariirkii Northridge.

Isku day in aad bixiso tusaaleyaal kale oo dhawr ah oo aan ku saabsanayn dhulgariir.

Samaynta Hawlgalka Goobidda

Hul Tiirsama

Muuqaal 5.16


U sheeg kooxda in Hulalka Tiirsama ay samaysmaan marka uu derbi dumay ku tiirsan yahay derbi dibedda ah. Dhibbanaha ku hoos jira hul tiirsan wuxuu fursadda ugu weyn u leeyahay in uu noolaado.

Adkee in hulalka tiirsama ay sidoo kale muujiyaan in dhismuhu uusan ruxaneyn. Hadday xubnaha CERT arkaan hulal tiirsan, waa in ay u aqoonsadaan meesha jawaabayaasha xirfadleyda ah laakiin ay markiiba ka tagaan dhismaha!



MUUQAAL 5.17

SAMAYNTA HAWLGALKA GOOBIDDA (WELI SOCOTA)



Sharax in Hulalka "V" uu sameeyo dumis "V" ah oo ay dumidda falaatka ama derbigu keenaan (Bartanka ayaa duma dhinacyaduna waxay ku harsanaadaan derbiga kore). Xusuusi kooxda in hulka "V" uu sameeyo laba hul oo tiirsan, oo uu mid waliba hal dhinac oo burburka yahay oo markaa ay dhabbaneyaashu ku xannibmi karaan—laakiin falaatka soo laallaada ee ay samaysay "V" da ayaa halis badan ku hayn kara kooxda samatabbixinta.

Adkee in haddii ay kooxaha CERT la kulmaan hulalka "V" ay tahay in ay markiiba ka baxaan dhismahaa.



MUUQAAL 5.18

SAMAYNTA HAWLGALKA GOOBIDDA (WELI SOCOTA)

Samaynta Hawlgalka Goobidda

Hulalka keli-keliga ah

Muuqaal 5.18

Sharax in hulalka keli-keliga ah ay yihiin bedadka laga yaabo in ay dhibbanayaashu ugu xamaarteen in ay ku bedbaadaan. Tusaaleyaasha hulalka keli-keliga ah waxa weeye darka musqusha, iyo bedka miiska hoostiisa ah. Carruurto waxay ku carari karaan bededka yaryar sida khaanadaha.



WEYDII SU'AAL

**Weydii in ay cidina su'aal ka qabto noocyada
hulalka intaadan sii wadin.**

U sheeg kooxda in ka dib markii la aqoonsado meelaha lagu go'doomi karo, ay tahay in ay xubnaha CERT:

- Ogaadaan hilaadda tirada dhibbaneyaasha.
- Ogaado meelaha ay u badan tahay in lagu go'doomo.

Tilmaan in qaar ka mid ah xogahan lagu ogaan karo qorshaynta, laakiin xubnaha CERT waxay xog ka heli karaan markii ay la hadlaan goob-joogeyaasha iyo kuwa taagtaagan oo aad wax uga og dhismahaasba.



**SHARAX
SU'AALAH**

SAMAYNTA HAWLGALKA GOOBIDDA (WELI SOCOTA)

Sharax in xubnaha CERT ay dadkaas ay la hadlayaan weydiiyaan su'aalo ay ka mid yihiin:

- Imisaa qof baa ku nool (ama ka shaqaysa) dhismaha?
- Xaggee bay haddaa joogi kareen?
- Waa maxay khariidadda dhismuhu (qaabka dhismaha)?
- Maxaad aragtay ama maqashay?
- Ciduna ma soo baxday?
- Waa xaggee marinnada bixitaanka ee caadiga ah ee dhismahan?

Uga dig kooxda in goob-joogayaashu ay ku wareersanaan karaan dhacdada. Waxay u badan tahay in ay buunbuuniyaan tirada dadka ku jiri kara meesha, ama xitaa dhacdadaba si saxan uma xusuusan karaan. U sheeg kooxda in uruursadaan wixii xog ah oo ay heli karayaan, maxaa wacay waxay xogtani muhiim u noqon doontaa qorshaynta muhiimadaha goobidda iyo weliba fulinta goobidda.



MUUQAAL 5.19

SAMAYNTA HAWLGALKA GOOBIDDA (WELI SOCOTA)

DARIIQADA GOOBIDDA

Dariiqo goobidda ah oo waxgal ah:

- Waxay muujisaa meesha uu joogo samatabbixiyaha.
- Waxay ka hortagtaa in hal hawl ah lagu wada mashquulo

Muuqaal 5.19

Qaybtan ku billow adigoo kooxda u sheegaya in dariiqooyin goobid oo waxgal ahi ay:

- Muujisaa meesha uu joogo samatabbixiyaha.
- Ka hortagtaa in hal hawl ah lagu wada mashquulo.



MUUQAAL 5.20

Dariiqooyinka Goobidda

1. U yeer-yeeridda dhibbanayaasha.
2. Isticmaalidda nidaam isku wada habaysan oo goobid ah.
3. Mar mar istaag si aad u dhegaysato
4. Saddex xagalee.
5. Calaamadee aagagga la baaray si aad qoraal u geliso natiijooyinka.
6. Soo sheeg natiijooyinka.

Muuqaal 5.20

SAMAYNTA HAWLGALKA GOOBIDDA (WELI SOCOTA)

U sheeg kooxda in shaqaalaha khibrada u leh goobidda iyo samatabbixinta ay ogaadeen in ay dariiqooyinka soo socdaa wax gal yihiin:

1. Goobidda ku billow u yeer-yeeridda dhibbaneyaasha. Waxaad cod dheer ku dhahdaa, "Ciddii I maqli kartaa, halkan ha timaaddo." Haddii ay dhibbanayaasha qaar kuu yimaadaan, tilmaamo cusub sii sida "Jooga halkan" ama "Igu suga Dibedda" (iyadoo ku xiran xaaladda dhismaha). Dhibanayaasha soo baxay waxaad wax ka weydiisaa wixii xog ah ee ay ka hayn karaan dhismaha ama dad kale oo ku dhex xannibmay.
2. Isticmaal nidaab habaysan oo goobid ah. Xaqiiji in aagagga dhismaha oo dhan la wada ogaaday. Tusaalayaasha nidaamka habaysan ee baaridda waxaa ka mid ah:
 - Min hoos ilaa kor/kor ilaa hoos.
 - Derbiga midige/bidixe.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

Xusuusi kooxda in kuwa aan yeeridda ka jawaabin laga yaabo in ay shoog qaadeen oo wareersan yihiin. Soo jeedi in markii ay tilmaamayaan dhibbanayaasha, ay xubnaha CERT toos u fiiriyaan dhibbanayaasha, ku hadlaan jumlado gaaggaaban, tilmaamahoodana ay ka dhigaan kuwo sahlan.

3. Mar mar istaag si aad u dhegaysato. Dhegayso dhabaandhaw in aad maqasho, ama dhaqdhaqaaq, ama codad



MUUQAAL 5.21

Samaynta Hawlgalka Goobidda

Saddex xagalaynta

Muuqaal 5.21

SAMAYNTA HAWLGALKA GOOBIDDA (WELI SOCOTA)

4. Saddex xagalee. Saddex-xagalayntu waxay samatabbixiyeyaasha u suuroggelisaa in iyagoo hal meel ah taagan ay fiirin karayaan dhawr jiho. Saddex samatabbixiye, oo uu hoggaaminayo dhawaaqa dhiibaneyaasha, waxay sameeyaan saddex xagal ku hareeraysan aagga waxaanay toosh weyn ku shidaan aagga. Iftiinka ka imanaya jihooyin kala duwan wuxuu tirtirayaa hooskii qarín lahaa dhibbaneyaasha.
5. Calaamadee aagagga la baaray si aad qoraal u geliso natiiqooyinka. Meel ku xigta albaabka ku samee hal xarriiq oo janjeera wax yar ka hor inta aadan gelin dhismaha. Isku tallaab ku samee xarriiqii (samee "X") markii dhamaan kuwii ku jirey laga saaro oo dedaallada goobidda iyo samatabbixinta la dhamaystiro. "X" du waxay goobayaasha kale u muujinaysaa in aaggan horay loo goobay. Dariiqadani:
 - Waxay muujisaa goobta uu samatabbiyuhu joogo.
 - Waxay ka hortagtaa is-daba yaac iyo hal wax wada qabad.
6. Soo sheeg natiiqooyinka. Hayso diiwaan dhamaystiran oo dhibbaneyaasha la samatabbixiyey iyo kuwa xanniban ama dhintay ah. Xogtan u gudbi shaqaalaha adeegyada gurmada markay goobta soo gaaraan.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

Ka dib markii ay muraajiceeyaan dariiqooyinka goobidda, macallinku (miintu) waa in ay qol dhexdii ku muujiyaan sida loo sameeyo goobid, iyadoo ay la socoto sida wax loo goobo (tusaale, derbiga midige/derbiga bidixe) oona ay calaamadaynayaan albaabka agtiisa. Muujinta waxaa lagu samayn karaa qol kasta; miisas, kuraas, iyo alaabo kale ayaa loo isticmaali karaa si loo jilo qashinka burburku.

Weydii ka qaybgalayaasha in qofna uu qabo wax su'aalo ah oo ku saabsan habraaca qorshaynta iyo fulinta hawlgallada goobidda ama dariiqooyinka ku lug leh goobid waxgal ah.

U sheeg ka qaybgalayaasha in qaybta tan xigta ay ka hadli doonto samaynta hawlgallada samatabbixineed.



BANDHIG
MAWDUUCA



MUUQAAL 5.22

SAMAYNTA HAWLGALLADA SAMATABBIXINTA

Ku billow mawduucan adigoo sheegaya in samatabbixin ay ku jiraan saddex hawlood oo asaasi ah:

Samaynta Hawlgallada Samatabbixinta

Doorarka billowga ah:

- Abuuridda bay'ad samatabbixin nabdoon
 - Ashyaa'da jidka ka durji.
 - Qalab u isticmaal dhaqaajinta aaladaha.
 - Xaaq burburka.
- Kala-soocidda iyo dejinta dhibbanayaasha
- Raridda dhibbanayaasha

Muuqaal 5.22

Sharax in samaynta hawlgal samatabbixin ahi ay ku jiraan:

- Abuuridda bay'ad samatabbixineed oo nabdoon adigoo waxyaabaha dariiqa ka eexinaya, adigoo isticmaalaya gacan-qabsiyada lagu qaado alaabaha, iyo xaaqidda qashinka burburka.
- Qaymaynta iyo dejinta dhibbaneyaasha.
- Bixinta dhibaneyaasha markay qiimayntu dalabto.

Sharax in mid kasta oo mawduucyadaa ka mid ah gaar looga hadli doono.



MUUQAAL 5.23

SAMAYNTA HAWLGALLADA SAMATABBIXINTA
ABUURIDDA BAY'AD NABDOON

Abuuridda Bay'ad Nabdoon

Yoolalka:

- Gacanta ku hay nabdoonaanta samatabbixiyeyaasha
- Kala sooc dhismayaasha aadka u burburay iyo kuwa ay gaareen burburrada khafiifka ah.
- Si degdeg ah uga rar dhibbanayaasha dhismayaasha sida dhexdhexaadka ah burburay—yaree dhaawaca.

Muuqaal 5.23

U sheeg ka qaybgalayaasha in ay jiraan saddex yool oo ay wada leeyihiin samatabbixinnada oo dhan:

- Gacanta ku haynta nabdoonaanta samatabbixiyeyaasha
- Kala soocidda dhismayaasha aadka u burburay iyo kuwa ay gaareen burburrada khafiifka ah.
- Si degdeg ah uga raridda dhibbanayaasha dhismayaasha sida dhexdhexaadka ah burburay—yareeynta dhaawaca.

Adkee in mid ka mid ah yoolashaas aan la gaari karin iyadoo aan la samayn bay'ad nabdoon inta aan laysku deyin in wax la samatabbixiyo. Waxaa markaa jira taxaddarro dhawr ah oo ay tahay in ay sameeyaan samatabbixiyeyaashu si ay halista u dhimaan.



MUUQAAL 5.24

CONDUCTING RESCUE OPERATIONS (CONTINUED)

Digniinaha Yareynta Khataraha

Bay'ad Nabdoon:

- Ogow cilladahaaga.
- Raac habraaca nabdoonaanta.
- Qashinka burburka ku xaaq:
 - Kabaallayn.
 - Dharabayn.

Muuqaal 5.24

- Ogow cilladdaada. Mutaddawiciin badan ayaa hawlgal samatabbixin ku dhaawacantay ama ku dhimatay sababtuna ay ahayd in aysan markii horeba eegin gaabintooda dhinaca jirka iyo maskaxdaba. Samatabbixiyeyaasha CERT waa in ay qaataan waqti ay wax ku cunan, biyo ku cabaan, kuna yara nastaan si ay hawsha ugu noqon karaan iyagoo wata maskax deggan iyo tamar korodhay.
- Raac habraaca Nabdoonaanta. Xubnaha CERT waa inay weligood isticmaalaan qalabka ku habboon nabdoonaanta ee xaaladda loogu baahan yahay oo ayna raacaan habraacyada nabdoonaanta, oo ay ku jiraan:
 - Wehel la shaqaynta.
 - In aysan weligood gelin dhisme ruxanaya.
 - In ay wax qaadaan iyagoo jilbaha laabaya dhabarkuna uu toosan yahay, oo lugaha markaa culaysku uu ku dhacayo.
 - Xamuulka u dhawaynata jirkooda.
 - Dhifanaya ama xamaalaya wax aan caqliga ka badnayn.

U dir ka qaybgalayaasha jaantuska cinwaankiisu yahay *Sida Wacan ee Jirka Wax Loogu Dhifto (qaado)*, ee ku yaal Buugga Ardayga.




PM, P. 5-24



PM, P. 5-24

Sida Wacan ee Jirka Wax Loogu Dhifto (qaado)



Sida Wacan ee Jirka wax Loogu Dhifto oo muujinaysa dhabar toosan iyo jilbaha oo wax lagu dhifanayo.

SAMAYNTA HAWLGALLADA SAMATABBIXINTA (WELI SOCDA)

U sheeg kooxda in ay la kulmi karaan xaalado ay khasab tahay in burburka qashinka uu daadshay la nadiifiyo si loo xoreeyo dhibbaneyaasha. Markii la galo xaaladahaas oo kale, samatabbixiyeyaaasha CERT waa in ay tixgeliyaan dallicidda iyo weelaynta si loo dhaqaajiyo oo meelihii la rabay loo geeyo burburka inta uu ka dhamaanayo hawlgalka samatabbixintu.

- Dallicidda waxaa lagu sameeyaa adigoo kabaal gelinaya aaladda la doonayo in la dhaqaajiyo, adigoo shay aan dhaqaayan kabaalka hoos dhigaya si ay u noqoto xajiye. Markii kabaalka hoos looga riixo dhinacaaga, dhankii kale ee kabaalka ayaa alaabta dhifanaya.
- Weel waa shay alwaax ah oo loogu talaggalay taageeridda iyo xoojinta. Santuuq ku weelaynta micnaheedu waxa weeye isku duwidda dhawr alwaax oo ballaaran oo lays dhaafsho si ay u sameeyaan laydi deggan oo gudihisa ay wax ku xannibmi karaan.



XUSUUSINTA
MACALLINKA



PM, KA
DAMBEEYA
CUTUB 5



XUSUUSINTA
MACALLINKA

Tus kooxda Kabaallaynta iyo Weelaynta (dherabaeynta)

U dir ka qaybgalayaasha qaybta cinwaankeedu yahay *Qormooyin Dheeraad ah*, ee ku taal dhamaadka Cutub 5 ee Buugga Ardayga, si uu kuugu qeexo hawlgalka kabaallaynta iyo weelaynta iyo jaantus muujinaya hannaanka loo sameeyo santuuq ku weelaynta.

Qormooyinkaa sidoo kale qancintaadaa loogu daray Tilmaantan, iyagoo ka billowda bogga AD-5- 3.

Sharax in kabaallaynta iyo weelaynta la wada isticmaalo iyadoo marna shayga la ururinayo oo santuuqa lagu weelaynayo marna kabbaallaynta lagu dallacayo uu lagu qaadayo. Nabdoonaanta ayaa ah lambar kow 1: "Dhifo hal inji, weelee hal inji."

Ku dig in kabaallaynta iyo weelayntu ay is xigxigaan— sabab degganaasho iyo in shaqada la sahlo awgeed. Waxaa sidoo kale muhiim noqon karta in kabaallaynta iyo weelaynta laga isticmaalo in ka badan hal meel ah (sida., horay iyo gadaal) si loo xaqiijiyo xaalad deggan.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

SAMAYNTA HAWLGALLADA SAMATABBIXINTA (WELI SOCDA)

Adkee in aan weelaynta iyo kabaallaynta iska soo horjeedo abidkeed la samayn karin, maxaa wacay samaynteedu waxay kordhinaysaa degganaan la'aanta qashinka burburka. Soo jeedi in, kabaallaynta looga baahan yahay labada dhinac, ka qaybgalayashu waa in ay ka kabaaliyaan kana weeleeyaan hal dhinac, dabadeedna ay dhinaca kale sidaa ugu celiyaan mar kale.

Uga dig ka qaybgalayaasha in markay gaari karaan dhifasho ku filan, ay tahay in ay saaraan dhibbanaha, deedna ay dhankii kale u dhigaan kabaallaynta si ay u dhigaan shaygii qofka dul saarnaa. Ku adkee in aanay abid ka tegin xaalad aan nabdoonayn.

U sheeg kooxda in markay ku khasbanaadaan in ay burbur qashinkii xaaqaan si ay u helaan dhibbaneyaal, ay tahay in ay sameeyaan silsilad aadami ka kooban oo uu qofba kan ku xiga u dhiibayo qashinka. U sheeg haddana in ay ka sameeyaan silsiladdaa meel aan khashkhashaynin hawlgallada samatabbixinta. Sidoo kale xusuusi in ay xirtaan galoofyada saanta ah si ay u dhawraan gacmahooda.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

Weydii ka qaybgalayaasha in uu midkoodna wax su'aalo ah ka qabo hawlaha samatabbixinta.



WEYDII SU'AAL

Weydii ka qayb galayaasha dhaw su'aalood oo "Maxaad samayn lahayd haddii?" ah si aad u xaqiijiso in ay fahamsan yihiin waxay baranayaan. Markaad su'aalaha weydiinaysid seenyo (wax dhici kara) kooban same oo ka qaybgalayaasha weydii waxay xaaladdaa uga jawaabi lahaayeen.

Marka ay caddaato in ka qaybgalayaashu ay fahamsan yihiin ra'yiga samaynta hawlaha samatabbixinta, u sheeg in qaybta tan xigta ay ka hadli doonto bixinta dhibbanayaasha.



MUUQAAL 5.25

**SAMAYNTA HAWLGALLADA SAMATABBIXINTA (WELI SOCDA)
BIXINTA DHIBBANEYAASHA**

Bixinta Dhibbaneyaasha

Noocyada bixinta dhibbanayaasha waxaa ka mid ah:

- Is bixin ama garab gelid
- Dhifashooyin iyo jiidisyo

U oggolow dhibanayaasha in ay iyagu isa siibaan markay suuraggal tahay.

Muuqaal 5.25

Ku billow qaybtan adigoo sharxaya in ay jiraan labo cayn oo loo baxsho dhibbanayaasha:

- Is bixin ama garab gelid
- Dhifashooyin iyo jiidisyo

Sharax in badanaa ay aad u wanaagsan tahay in dhibbane dhaqaaqi kara loo oggolaado in uu isagu meesha iska soo siibo. Uga dig kooxda, in, ha yeeshee, mararka qaar dhibbanayaasha dhaqaaqi kara ayaan u bed qabin ama u xoogganayn sida ay iyaga la tahay. Marka ay dhibbanayaashu ka xoroobaan wixii xannib ah, waxay caawin ugu baahan karaan sidii ay dhismaha uga bixi lahaayeen.



MUUQAAL 5.26

SAMAYNTA HAWLGALLADA SAMATABBIXINTA (WELI SOCDA)

Dariiqada Siibidda

Waxay ku xiran tahay:

- Degganaanshaha guud ee aagga kugu teedsan.
- Tirada samatabbixiyeyaasha la heli karo.
- Awoodda iyo kartida samatabbixiyeyaasha.
- Xaaladda dhibbanaha.

Muuqaal 5.26

Sharax in nooca dariiqada siibidda ee la doortay ay tahay in ay ku xiran tahay:

- Degganaanshaha guud ee aagga kugu teedsan.
- Tirada samatabbixiyeyaasha la heli karo.
- Awoodda iyo kartida samatabbixiyeyaasha.
- Xaaladda dhibbanaha.

Sharax in ka qaybgalayaashu ay baran doonaan noocyo asaasi ah oo bixinta dhibbanaha ah ayna fursad u heli doonaan in ay qaar ka mid ah farsamadaas ku celceshadaan.

Uga dig ka qaybgalayaasha in haddii ay nabdoonaanta iyo waqtigu oggolaadaan, ay tahay in aysan isticmaalin dhifasho iyo jiidis si aad u bixiso bukaannada markii looga shakiyo dakhar madaxa ah iyo dhaawac lafdhabarta ah. Mararkaas oo kale, waa in lafdhabarta laga dhigaa mid aan dhaqaaqayn iyadoo lox boor ah la isticmaalayo. Albaabbada, miisaska iyo alaabaha la midka ah ayaa laga dhigi karaa kabaygaas lafdhabarta lagu dejinayo. Kobaygaasi waa in uu karaa in lagu xambaaro qofka, waana in la isticmaalaa farsamooyin dhifasho oo xaaladda ku habboon. Marka la dhaqaaqinayo dhibbaneyaasha, samatabbixiyeyashu waa in ay ku hawlgalaan wada shaqayn iyo xiriir, oo ay lafdhabarta dhibbanaha ku dhawraan xaalad toosnaan ah. Xusuusnow, nabdoonaanta samatabbixiyaha iyo xaaladda dhismaha ayaa sida la yeelayo ay ku xirraan doontaaye.



XUSUUSINTA
MACALLINKA



PM, PP. 5-27 &
5-28



XUSUUSINTA
MACALLINKA



XUSUUSINTA
MACALLINKA

SAMAYNTA HAWLGALLADA SAMATABBIXINTA (WELI SOCDA)

Muraajicee astaamaha dhaawaca madaxa iyo lafdhabarta hadday muhiim tahay.

Tilmaan in ay jiraan dhawr cayn oo dhifasho iyo qaadis ah. U dir ka qaybgalayaasha Jaantusyada uu cinwaankoodu yahay, *Noocyada Dhifashada iyo Qaadidda*, ee ku yaal Buugga Ardayga. Tusaale ahaan, haddii uu samatabbixiyuhu uu yahay mid xoog badan dhibbanuhuna uu bar yar yahay, wuxuu isticmaali karaa hal-qof gacan ku qaadis si uu u dhifto oo u qaado dhibbanaha isagoo:

- Isku qabanaya hareeraha dhabarka iyo jilbaha hoostooda.
- Dhifanaya dhibbanaha iyadoo yuu dhabarka samatabbixiyuhuna toosan yahay oo uu lugaha dhifashada culayskeeda saarayo.

Muuji is qaadiddan adigoo mutaddawac ka dhiganaya dhibbane. Dabadeed dhamaan ka qaybgalayaasha awoodda u leh ha isku biireen oo ha muraajiceeyeen qaadidda. Ogow: Tixgeli xajmiga dhibbanaha iyo fogaanta uu rabo in la xambaarsanaado inta aadan qaadiddan ku kicin.

Fasax u sii ka qaybgalayaasha ninkii aan ku jacsanayn uu isaga daayo xambaaridda. Xusuusi ka qaybgalayaasha in nabdoonaanta xubnaha CERT ay tahay muhiimadda lambarka koowaad.

U sheeg ka qaybgalayaasha in dariiqo kale oo uu hal samatabbixiye ugu qaadi karo meel nabdoon ay tahay xambaarsiga. Marka la samaynayo dariiqadan, waa in uu samatabbixiyuhu:


- Tallaabo 1: Istaagaa dhabarkiisa/eeda oo xiga dhibbanaha.
- Tallaabo 2: Korka ka saaraa gacmaha dhibbanaha garbaha samatabbixiyaga, oo gacmahana u soo qabtaa dhinaca xabadka samatabbixiyaha.
- Tallaabo 3: U soo tiiriyaa dhibbanaha dhinaca hore, inta ay caghiisa ka fiid-saarayaan sibidhka.

Muuji dhifashadan adigoo labo macallin isticmaalaya. Dabadeed ka qaybgalayaashu hays qaybsheen oo ha bar-barteen dhifashada.




PM, P. 5-27

Noocyada Dhifashada iyo Xambaarka



Hal-Qof Gacan ku Qaadis

Hal-qof Gacan ku Qaadis muujinaysa samatabbixiyihii oo dhibbanaha haya dhabarka dhinacyadiisa iyo jilbaha hoostooda.



Hal Qof ah oo Xambaarsan Dhibbane

Qaadidda Xambaarsiga ah oo uu samatabbixiyuhu gacmaha dhibbanaha garbihiisa saartay oo uu qabtay gacmihii dhibbanaha oo xabadkiisa ka hormariyey oo uu markaa sare u dallacay dhibbanihii isagoo markaa yara dugaya.




PM, P. 5-28

Noocyada Dhifashada iyo Xambaarka



Labo qof oo Xambarsan

Labo Qof Qaadiddood oo uu samatabbixiye 1 kadalloobsanayo madaxa dhibbanaha oo uu qabanayo dhexda oo dhinaca dambe ah. Samatabbixiye 2 wuxuu kadalloobsanayaa jilbaha dhibbanaha dhexdooda, markaasuu dhinaca sare jilbaha ka qabanayaa. Markaasay labada samatabbixiyeba dhibbanaha la istaagayaan.



Kursi ku Qaadid

Kursi ku qaadid dhibbanaha la dulsaaray kursi gadaal u janjeera, markii ay samatabbixiyeyaashu qadayan dhibbanaha. Qaadiddani waxay u baahan tahay labo samatabbixiye.

SAMAYNTA HAWLGALLADA SAMATABBIXINTA (WELI SOCDA)

Sharax in bixinta dhibbanaha ay tahay sahal marka ay samatabbixiyeyaal badani joogaan. Haddii ay laba samatabbixiye joogaan, waxaa dhibbanaha lagu qaadi karaa labo xagayn.

- Samatabbixiye 1: Kadaloobso madaxa dhibbanaha oo dhexda qabo. Laac kilkilaha oo qabo gacanta hore ee dhibbanaha.
- Samatabbixiye 2: Kadalloobso labada jilib ee dhibbanaha dhexdooda, adigoo ama dhinaca dhibbanaha u jeeda ama ka sii jeeda. Dhinaca sare ee lugaha dhibbanaha ka qabo meesha ay jilbuhu ku yaalliin.
- Labada samatabbixiye: U kaca sidii istaagga oo kale, adinkoo dhabarkiinnu toosan tahay oo lugaha wax ku xambaaraya. U socodsiiya dhibbanaha meel bedbaado leh.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

Muuji dhifashadan adigoo ka qaybgale oggolaaday u isticmaalaya sida dhibbane. U oggolow dhamaan ka qaybgalayaasha jir ahaan awooda in ay ku bar-bartaan dhifashadan: Ka dhig ka qaybgalayaasha kooxo saddex saddex ah (labo samatabbixiye iyo hal dhibbane) iskuna bed-beddel doorarka si uu qof walba u helo fursad uu iskugu dayo gelidda boosaska labada samatabbixiye.

Muuji in labo samatabbixiye ay kale oo dhibbanaha ku fariisin karaan oo ku qaadi karaan kursi.

- Samatabbixiye 1: Isagoo ku sii jeeda dhabarka kursiga, ayuu dhabarka dhibbanaha kor u qaadayaa.
- Samatabbixiye 2: Isagoo ka sii jeeda dhibbanaha, ayaa gadaal gacmaha u taagaya oo qabanaya labada lugood oo hore ee kursiga.
- Labada samatabbixiye: Kursiga u janjeeri gadaal, qaad, oo la soco.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

Adigoo isticmaalaya kursi adag, muuji qaadiddan oo u isticmaal labo macallin samatabbixiyeyaal, arday oggolna dhibbane. Dabadeed dhamaan ka qaybgalayaasha awooda jir ahaan ha ku bar-barteen qaadiddan, iyagoo u shaqaynayo kooxdii saddexda qof ahayd lafteedii.

SAMAYNTA HAWLGALLADA SAMATABBIXINTA (WELI SOCDA)

U sheeg ka qaybgalayaasha in dhibbaneyaasha aan si kale lagu bixin karin aad ku samayn karaan buste ku qaadid. Ogeysii in buste ku qaadiddu ay u baahan tahay ugu yaraan lix samatabbixiye si loo xaqiijiyo degganaanta dhibanayaasha, waana in hal samatabbixiye loo xilsaaro in uu qofka hago:

- Tallaabo 1: Buste ku fidi dhibbanaha dhiniciisa.
- Tallaabo 2: Xaluuli bustaha dhibbanaha hoostiisa, oo u wareeji dhibbanaha bartamaha bustaha.
- Tallaabo 3: Iyadoo ay saddex samatabbixiye kadalloobsanayaan dhinac kasta oo ay “dheg” qabanayaan, qofka hogaaminayana wuxuu hubinayaa in xoogga samatabbixiyeyaashu uu si siman u qaybsan yahay iyo in si sax ah kor loogu qaado dhibbanahaba.
- Tallaabo 4: Qofka hoggaanka ah ayaa kor u dhahaya, “Diyaar u noqo in markaan saddex tiriyo aad qaaddo: Kow, laba, saddex, *dhifo*”
- Tallaabo 5: Kooxda ayaa dhibbanaha dhifanaya oo hal mar wada istaagaya— dhibbanaha oo siman—oo marka hore lugaha dhibbanaha la qaadayo.

Tilmaan in ay tahay in kooxdu sidoo kale ay tahay in ay hal mar ah laallaadiyaan dhibbanaha, iyagoo isticmaalayo tallaabooyinkan:

- Tallaabo 1: Qofka hoggaanka ahaa ku dhawaaqaya, “Diyaar u noqo in markaan saddex tiriyo aad laallaadiso: Kow, laba, saddex, *laallaad!*”
- Tallaabo 2: Kooxda ayaa dhibbanaha laallaadinaysa hal mar, iyagoo taxaddar samaynaya si uu u sinnaado dhibbanuhu.

Weydiiso ka qaybgalayaasha in ay oggolaadaan in ay muujiyaan buste-ku-qaadidda. Hubi in dhamaan ka qaybgalayaashu ay fursad u heleen in ay ku bar-bartaan qaadiddan.

Sharax in waxyaabo dhawr ah—sida bustayaal— loo isticmaali karo in ay noqdaan bareelle la macmalay.





PM, PP. 5-29 &
5-30


SAMAYNTA HAWLGALLADA SAMATABBIXINTA (WELI SOCDA)

Tilmaan in samatabbixiyeyaashu ay kale oo jiidi karaan dhibbanaha meel go'doonsan ku jira iyagoo qabanaya gacmaha iyo lugaha dhinacooda hoose oo markaa ku jiidaya dhulka. (U dir ka qaybgalayaasha shaxda cinwaankeedu uu yahay *Farsamooyinka Jiidda Saxda ah*, ee ku yaal Buugga Ardayga si ay u arkaan.) Ogeysii ka qaybgalayaasha. Ogeysii ka qaybgalayaasha in, iyadoo ay sidaa tahay, haddii aan la waayin si kale oo dhibbanaha loo bixiyo, waqtiguna uu aad u xasaasi u ahayn, aanay isticmaalin jiiditaankan marka laga yaabo in qashinka burburku uu sababi karo dhaawac dheeraad ah.




PM, P. 5-29 &
5-30

Farsamooyinka Saxda ah ee Jiididda



Farsamooyinka Saxda ah ee Jiididda

Farsamo Saxan oo Jiiditaanka ah oo muujinaysa samatabbixiyaha oo qabanaya lugaha iyo gacmaha dhibbanaha oo haya ama lugaha ama garbaha oo ka jiidaya meesha khatarta ah.



Buste ku Jiidid

Buste ku Jiidid muujinaysa dhibanaha oo ku duuban buste oo uu samatabbixiyuhu kadalloobo madaxa dhibbanaha meel u dhaw. Samatabbixiyaha ayaa bustaha ka qabanaya madaxa dhibbanaha gadaashiisa oo ka jiidaya meesha khatarta leh.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

CONDUCTING RESCUE OPERATIONS (CONTINUED)

Sidoo kale sharax in markii loo baahdo, hal samatabbixiye ah uu buste ku jiididda isticmaali karo isagoo raacaya tallaabooyinka soo socda:

- Tallaabo 1: Ku duub dhibbanaha buste.
- Tallaabo 2: Kadalloobso oo qabo dhinaca bustaha.
- Tallaabo 3: Ku jiid dhibbanaha dhulka.

Weydii ka qaybgalayaasha haddii uu qofna qabo wax su'aalo ah oo ku saabsan hawlgallada samatabbixinta iyo bixinta dhibbanaha.

U sharax in ka qaybgalayaashu ay markan heli doonaan fursad ay ku bar-bartaan qaar ka mid ah farsamooyinka bixinta dhibbaneyaasha.

LAYLI: BIXINTA DHIBBANEYAASHA



QABO LAYLI

Ujeedo: Layligani wuxuu ka qaybgalayaasha siinayaa fursad ay ku sii barbartaan sida dhibbanayaasha looga baxsho meel duntay, iyadoo la isticmaalayo dariiqooyinka kala ah, kabaallaynta/weelaynta, jiididda iyo qaadidda. Waxaa ka qaybgalayaasha loo qaybin doonaa kooxo, waxaanay samayn doontaan goobid qoleed, helid dhibbane, iyo bixinta dhibbanayaasha. Iyadoo hal mar ah la isticmaalayo saddex qol, si ay u jiraan dhawr "samatabbixin" ooh al mar socota, waxaa laga samayn karaa halkaas seenyo dhab u eg oo laakiin jilan.

SAMAYNTA HAWLGALLADA SAMATABBIXINTA (WELI SOCDA)

Tilmaamo: Isticmaal tallaabooyinka soo socda si aad u dhamaystirto layligan:

1. Ka dhig ka qaybgalayaasha kooxo lix lix ah. Weydiiso laba xubnood oo kooxda ah in ay dhibbanayaasha noqdaan marka hore.
2. Isugu gee dhibbanayaasha kobta burburku ka dhacay, adigoo isticmaalaya miisas, shelefyo, iwm., si aad u meteshaan burbur qashin ah. Alaabta kale si baalinnimo leh u daadi dhinacyada dhibbanayaasha. Hubi in ay jiraan alaab taalla meesha oo loo isticmaali karo kabaal ahaan (tus., 2" x 4"s) iyo guntooda udub.
3. Ku amar kooxda in ay galaan qolka "meesha duntay" ee loo xilsaaray, oo ay sameeyaan goobid qol, helidda dhibbanayaasha, oo aanay isticmaalaan habka kabaallaynta iyo weelaynta si ay u sii saaraan dadkaas dhibban, oo weliba isticmaal dhifashada iyo jiididda ku habboon in aad dhibbanayaasha qolka ka soo saarto (haddii ay suuroggal tahayna, dhismahaba ka soo saar).

Macallimiintu ha fiirsadeen koox kasta si ay u saxaan khaladaadkii ay arkaan.

4. Kooxuhu haysku beddesheen doorarka si loo helo labo dhibbane oo cusub. Dib isugu habee dhibbanayaashii iyo "burburkii" Knau soo celceliya layliga ilaa uu qof walba fursad uga helayo in uu samatabbixiye metelo.
5. Kala hadal layliga kooxda gebigeed, adoo diiradda saaraya wixii farqi ah oo u dhexeeya farsamada kooxda iyo khibraddeeda.



XUSUUSINTA
MACALLINKA



TAX
QODOBBADA
MUHIIMKA AH

GEBAGGABADA CUTUBKA

Soo koob qodobbadii muhiimka ahaa ee cutubkaan:

- Goobid iyo samatabbixin waxay ka kooban tahay saddex hawlood oo kala duwan oo ay tahay in si taxaddar leh loo qorsheeyo oo loo sii muraajiceeyo musiibada ka hor. Go'aanka isku dayga in samatabbixin la sameeyo waa in uu ku salaysan yahay:
 - Khatarta meesha ku jirta.
 - Gaarida yoolka guud ee ah wanaagga ugu badan oo la sameeyo tirada u badan.

Ujeeddada goobidda iyo samatabbixintu waa in:

- Mar kasta la joogteeyo nabdoonaanta samatabbixiyaha.
- In la samatabbixiyo dadka ugu tirada badan waqtiga ugu gaaban gudihisa.
- Samatabbixi dadka aanan aad u xannibnayn marka horeba

Xusuusi ka qaybgalayaasha in CERTyadu ay ku xaddidan yihiin goobidda iyo samatabbixnaha yaryar. Himiladooda marka ay la tacaalayaan dhisme aad u burburay iyo xaalado kale oo khatar cad leh (sida., biyo kacaya ama xawli ku socda) waa uun in ay dadka kale u digaan.

- Qiimaynta goobidda iyo samatabbixintu waxay raacdaa hannaanka ay raacaan qiimaynada kale ee hawlgallada CERT. Qiimayntu waxay la socotaa dedaallada goobidda iyo samatabbixinta waxaanay xog ka bixisaa sidii wax loo sii wadi lahaa. Haddii ay qiimayntu muujiso in ay saarid lagama maarmaan tahay, himilada CERT waa in ay xaqiijisaa nabdoonaanta iyo habaysnaanta inta geeddiga lagu jiro.

Marka la qaato go'aanka billaabidda hawlgalka goobidda, goobayaasha CERT waa in ay:

- Isticmaalaan farsamooyin goobid ah oo habboon.
- Helidda dadka dhibbanaan kara.
- Helidda dhibbanyaasha waxa weeye dhamaystirka qiimaynta gudaha dhismaha si loo ogaado aagagga lagu xannibmi karo, dabadeedna qabashada goobid:

- Habaysan oo dhamaystiran.
- Ka fogaanaysa in hal hawl ah la wada qabto.
- Diiwaanisa natijoooyinka.

GEBAGGABADA CUTUBKA (WELI SOCOTA)

Goobiddu waa dhawr hawlood oo waaweyn:

- Abuuridda bay'ad nabdoon
- Qaymaynta iyo dejinta xaaladda dhibbanayaasha
- Qaadida dadka iyadoo lagu salaynayo qiimaynta

Hawlgallada samatabbixintu waxay ku xiran yihiin joogtaynta nabdoonaanta samatabbixiyaha, oo iyadu uga baahan xubnaha CERT in ay aqoonsadaan meelaha ay ka liitaan. Xubnaha CERT waa *inaysan* abidkood isku deyin qabashada sideedaba wax ka shisheeya xadkooda *waqtigaas isaga ah*.

Kabaallaynta iyo weelinta waxaa loo isticmaali karaa in qashinka burburka lagu xaaqo oo jid loogu furo dhibbanayaasha.

Dhibbanayaasha waxa loo saari karaa siyaabo badan, waxayna ku xiran tahay:

- Xaaladdooda.
- Tirada samatabbixiyeyaasha la heli karo.
- Xoogga iyo kartida samatabbixiyeyaasha.
- Bay'adda ay wax ka dhaceen.

Xusuusi ka qaybgalayaasha dhifashadii iyo jiididdii la noqotay kuwo sahlan, una soo jeedi in ay isticmaalaan isla jiididdaa iyo qaadiddaa marka ay duruufu saamaxdo.

Haddii ay oggolaato xaaladda dhismaha, dhibbanayaasha looga shakiyo dhaawac madaxa ama lafdhabarta ah waa in lagu bareelleeyo loox fidsan inta aan la qadin. Haddii ay suuraggal tahay, bixintooda xitaa waa in looga dambeeyo shaqaale EMS ah oo tababbaran.



XUSUUSINTA
MACALLINKA

Weydii ka qaybgalayaasha haddii ay cidi su'aal ka qabto wax ku saabsan waxyaabihii looga hadlay cutubkan.

XILSAAR SHAQO-GURI

Kooxda weydiiso in ay aqriyaan oo wax ka bartaan Cutubka 6: Habaysnaanta CERT iyo Cutub 7: Cilmunafsigu Musiibada ka hor casharka kan xiga.

Uga mahadceli ka qaybgalayaasha soo xaadiridda xisaddan. Xusuusi waqtiga iyo meesha casharka kan ku xiga, hadday muhiim tahay.